Folkhälsomyndigheten

Macluumaad ku saabsan tallaalka Astra Zeneca, tallaal loogu talogalay dadka ah 65 jir iyo ka weyn

Hey’adda caafimaadka bulshada waxay ku talinaysaa in tallaalka Astra Zeneca ee ka hortaga covid-19 gudaha Iswiidhan loo isticmaalo in lagu difaaco dadka ah 65 jir iyo ka weyn. Dadka ah 65 jir iyo ka weyn waxaa loo arkaa inay khatar xoogan ugu jiraan in ay aad ugu xanuunsadaan covid-19 iyo in ay hooseyso khatarta ah in ay saamayno khatar ah ka soo gaaraan tallaalkan. Hey’addan dawladeed waxay wakhti walba qiimeysaa aqoonta cusub ee ku saabsan tallaalka.

Si dadka ah 65 jir iyo ka weyn (dhashay 1956 iyo ka hor) looga difaaco cudurka covid-19 waxay u aragtaa He´adda caafimaadka bulshadu in tallaalka Vaxzevria (Astra Zeneca) ee ka hortaga covid-19 lagu isticmaali karo gudaha Iswiidhan.

Dadka ah 64 jir (dhashay 1957) iyo kuwa ka yar-yar wakhtiga imminka lagu jiro ma lagu tallalayo Vaxzevria. Taladan ayaa ansax ah oo sii soconaysa.

Bartamihii Maarso ayaa la joojiyay isticmaalka tallaalkaas iyadoo uu sababtu tahay baaritaan ku saabsan xaalado tiro yar oo ah xinjir dhiig ah oo ay weheliso dhiigid. Waxyeelladan la tuhmay ee dhif iyo naadirka ah waxaa lagu sheegay ugu horeyn dadka da’doodu yartahay.

Ka dib marki faallo ay soo saartay Hey’adda dawooyika ee Yurub (EMA) iyo wada tashiyo lala yeeshay khubaro joogta Iswiidhan iyo dalal kale labadaba ayaa Hey’adda caafimaadka bulshadu go’aamisay in dib loo bilaabo tallaalidda dadka ah 65 jir iyo ka weyn.

Gudaha Yurub waxaa Vaxzevria lagu bixiyay in ka badan 20 milyan oo goojo. Tallaalkan wuxuu qofka siiyaa difaac fiican oo ka hortaga covid-19. Waxaa loo arkaa inuu yareeyo khatarta in la qaado cudurkan, wuxuuna caawinayaa in la yareeyo faafidda covid-19 ee gudaha bulshada.

Tallaal kastaa waa tallaabo loo qaaday dhanka in la awoodo dib ugu noqoshada nolol ah bilaa xadayno oo ah ta imminka jirta.

Tallaalku wuxuu qofka ka ilaalinayaa cudurka

In la qaado cudurka covid-19 oo khatar loo galo cudur halis ah waa wax halis ah, gaar ahaan marka la eego dadka waayeelka ah (65 jir iyo ka weyn).

Solna Folkhälsomyndigheten, SE-171 82 Solna. Booqashada: Nobels väg 18. **Östersund** Folkhälsomyndigheten, Box 505, 831 26 Östersund.
Booqasho: Campusvägen 20. Telefoon 010-205 20 00 E-mail info@folkhalsomyndigheten.se www.folkhalsomyndigheten.se

Tallaalku waa mid ka mid ah qaababka ugu wax ku oolka badan ee in looga hortago, la iskagana difaaco cudurada. Dawooyinka oo dhan wa aay keeni karaan waxyeellooyin, taasina xitaa waa ay khuseysaa tallaallada. Ammaanka tallaallada lagu isticmaalo gudaha Iswiidhan waxaa wakhti walba la socda Hey'adda dawooyinka.

Tallaallada ka hortaga covid-19 waxaa ka dhasha waxyeellooyin qiyaas ahaan la mid ah tallaalada kale. Waxyeellooyinka ugu caadisan waa ficil-celino ay sabab u tahay tallaalka oo hawl gelinaya nidaamka difaaca ee jirka. Waxay ahaan karaan tusaale ahaan xanuun, barar ama meesha irbadda lagu duray oo diiran, ama dareen xanuun oo guud lehna madax xanuun iyo xummad/qandho. Waxyeellooyinkan badanaaba waa khafiif oo keligood ayay iska dhammaadaan hal maalin gudihiis.

Haddii waxyeellooyin cusub la ogaado waa la cusboonaysiinayaa macluumaadka badeecada ee sharraxda tallaalka sifooyinkiisa. Hey'adda arrimaha caafimaadka talooyinkeeda sida tallaalka loo isticmaalayo xitaa dib ayaa loo cusboonaysiin karaa.

Baaritaanka waxyeellooyinka aad u ah dhif iyo naadir

Hey'adda dawooyika ee Yurub (EMA) waxay xaqiijisay inuu jiro xiriir suurtagal ah oo u dhaxeeya tallaalka covid-19 Vaxzevria (Astra Zeneca) iyo xaaladaha dhif iyo naadirka ah ee xinjiro dhiig ah oo aan caadi ahayn oo la xiriira dhiig guntan hooseeya iyo mararka qaarkood dhiigid, gaar ahaan dhanka dadka da'doodu yartahay. Calaamadahan waa laga helaa bulshada xitaa iyagoo aan la tallaalin, laakiin aad ayay u yihiin wax aan ahayn caadi.

Calaamadahan waxay, muddo seddax usbuuc gudohood ah tallaalka ka dib, caadi ahaan ka soo baxaan hal ama dhowr meelood oo ka mid ah jirka iyagoo wata calaamado cudur oo xoog-xooggan.

Waa muhiim in loo feejignaado calaamadaha soo socda: dhowr meelood ama meelo cusub oo maqaarka ah oo u eeg in nabar ku dhacay ama dhowr ah meelo dhiig maqaarka korkiisa ah oo u samaysan sidii dhibco ama tusaale ahaan gudaha afka, dhiig sanka ka soo baxa oo wakhti dheer jira kaas oo ay adagtahay in la joojiyo, barar, lug ama gacan guduud noqotay ama si cad u damqanaysa (maaha hareeraha meesha qofka laga duray), madax xanuun xoog ah, aragtida oo isku dhex qasan, calool xanuun xooggan, neefta oo si kedis ah u adkaata iyo/ama xanuun shafka ah.

EMA, Hey'adda dawooyinka iyo Hey'adda caafimaadka bulshadu waxay u arkaan in faa'iidada tallaalkan leeyahay ay ka weyntahay khatarta in lagala kulmayo waxyeellooyinka. Tallaalkan wuxuu wax ku ool u yahay in laga hortago covid-19 oo la yareeyo in aad loogu xanuunsado iyo in loo dhinto. EMA waxay sii wadi doontaa inay ka warhayso warbixinnada ku saabsan xaalado la mid ah oo qiimeynaha ammaanka ee cusub waxaa loo samayn doonaa si joogto ah. Hey'adda

caafimaadka bulshadu waxay wakhti walba qiimeyn doontaa sida aqoonta cusub ay raad ugu yeelan karto talada dhanka isticmaalka ee gudaha Iswiidhan.

La xiriir daryeelka bukaanka haddii aad caafimaad daro dareemayso tallaalka ka dib

Haddii aad caafimaad daro dareemayso ama tallaalka ka dib aad welwel qabtid waa in aad la xiriirtaa laamaha caafimaadka si calaamadaha cudurka baaritaan loogu sameeyo, iyadoon taas loo eegeyn in lala xiriirin karo tallaalka iyo in kale. U sheeg in aad dhawaan is talaashay. Waxaad xitaa la xiriiri kartaa 1177 Hagidda daryeelka. Haddii aad dareento in aad si degdeg ah u xanuunsatay waa inaad wacdo 112.

Wax dheeraad oo ku saabsan tallaalka ka hortaga covid-19 ka akhriso